UK Health Security Agency

NHS

# Uur ma leedahay?

## Tallaaladani waxay gacan ka gaystaan inay idin difaacaan adiga, ilmahaaga iyo uurkaaga

**Hargab** (Ifilo)

**Xiiqdheer** (Cudurka xiiqdheerta)

**Fayraska Habdhiska Neefsashada** (RSV)



Talo dheeraad ah oo ku saabsan tallaalada kale iyo goorta la qaadanayo

immunisation

**Buug-yarahaan wuxuu sharaxayaa tallaalada bilaashka ah ee gacan ka gaysanaya inay**

- **adiga**
- **uurkaaga, iyo**
- **dhallaankaaga dhowaan dhashay**

**idin ka ilaaliyaan dhibaatooyinka caabuqa**

## Sidee ayay tallaaladu u shaqeeyaan?

Tallaaladu waxay habdhiska difaaca dabiiciga ah ee jirkaaga (habdhiska difaaca) ka caawiyaan inuu aqoonsado oo uu la dagaallamo qaar ka mid ah cudurrada faafa.

Markaad qaadato tallaal, habdhiska difaaca jirkaaga ayaa xoog yeelanaya si uu kaaga caawiyo ka hortagga inaad jirrato iyo inuu ilaaliyo uurkaaga. Unugyada difaaca jirka ayaa markaa ka dib u gudbaya dhallaanka uurka ku jira si ay uga caawiyaan ka ilaalinta cudurada xilliga dhalmada iyo ilaa dhawrka toddobaad ee ugu horreeya noloshooda.

**Miyaan naasnuujin karaa ilmahayga ka dib marka aan qaato tallaalka?**

Haa, waa badbaado inaad naaska nuujiso ilmahaaga ka dib markaad qaadato tallaalada MMR, ifilada, xiiqdheerta iyo RSV. Tallaalada qaarkood ee la bixiyo xilliga uurka ama ka dib, caanaha naaskaaga waxaa ku jiri doona unugyada difaaca si aad u sii wado inaad ilmahaaga la wadaagto difaaca adigoo u marinaya naasnuujinta.



# Tallaalada la bixiyo xilliga uurka

## Xiiqdheerta (cudurka xiiqdheerta)

Xiiq-dheertu waa cudur aad u faafa oo khatar aad ah ku noqon kara dhallaanka yaryar. Inta badan dhallaanka yaryar ee qaba cudurka xiiqdheerta waxay u baahan doonaan daryeel isbitaal.

Cudurka xiiqdheerta wuxuu sababi karaa dillaacyo dheer oo qufac ah iyo margasho kuwaas oo adkeynaya neefsashada. Dhawaaqa 'xiiqda' waxa sababa ku adkaanshaha neef qaadashada ka dib mar kasta oo qufaca dillaaco.

Cudurka xiiqdheerta wuxuu socon karaa ilaa 2 ama 3 bilood. Wuxuu qofka u horseedi karaa oof-wareen, biyir-beel iyo dhaawac joogto ah oo xagga maskaxda ah. Xaaladaha ugu xun, wuxuu qofka u horseedi karaa dhimasho.

**Waa maxay sababta aan ugu baahanahay tallaalka xiiqdheerta?**

Qaadashada tallaalka xiiq-dheerta markaad uurka leedahay waxay kor u qaadi doontaa difaacaaga. Unugyada difaaca jirka ee jirkaaga uu soo saaro ayaa sidoo kale loo gudbin doonaa ilmahaaga iyadoo loo sii marinayo mandheerta. Antiboodhiyan ayaa gacan ka gaysan doonaan inay ilmahaaga difaac ka helaan qufaca xiiqdheerta toddobaadyada ugu horreeya ee noloshooda.



## Goorma ayaan qaadan karaa tallaalka?

Caadi ahaan waxaad tallaalka xiiqdheerta qaadan doontaa wakhtiga baaristaada bartamaha uurka (badanaa usbuuca 20) laakiin waxaad qaadan kartaa xilli hore sida usbuuca 16.

Haddii aad gaartay usbuuca 20 ee uurka oo aadan welina qaadan tallaalka, la hadal GP-gaaga ama umulisadaada oo qabso ballan si aad u hesho tallaalka fursadda ugu horreysa ee aad hesho.

Si aad ilmahaaga u siiso ka-hortagga ugu fiican, waa inaad hiigsataa inaad qaadato tallaalka ugu dambayn usbuuca 32. Haddii aad seegto tallaalka, wali waxaad qaadan kartaa tallaalka goor dambe, in kasta oo laga yaabo in uu waxtarkiisu yaraado. Haddii aysan kuu suurtagelin in aad qaadato tallaalka ka hor dhalmada dhallaankaaga, weli waxaad qaadan kartaa ka dib dhalmada, taas oo yareyn doonta khatarta ah inaad cudurka xiiqdheerta qaadsiiso ilmahaaga. Waa muhiim in la qaato tallaalka xiiqdheerta inta lagu jiro muddada uurka kasta si kor loogu qaado heerarka antiboodhiga ee jirkaaga iyo si uu tallaalka gacan uga gaysto ilaalinta ilmahaaga.

## Waxaan u maleeynaayay in ilmaha la siinayo tallaalka xiiqdheerta?

Gudaha UK, dhallaanka waxaa la siiyaa tallaalka xiiq-dheerta markay gaaraan da'ada 8, 12 iyo 16 toddobaad. Ilmo badan oo qaba cudurka xiiqdheerta ee aadka u daran ayaa ku soo baxa cudurka toddobaadyada ugu horreeya ee noloshooda. Sida kaliya ee aad ku ilaalin karto ilmahaaga wakhtigan waa in aad qaadato tallaalka xiiqdheerta inta aad uurka leedahay.

## Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka?

Daraasadaha UK waxay muujiyeen in qaadashada tallaalka xilliga uurka uu ku dhawaad 90% waxtar u leeyahay ka hortagga xiiqdheerta ee dhallaanka dhowaan dhashay.

Kahortagga aad ka heleyso tallaalka waxay sidoo kale ka dhigan tahay inaysan aad u badnayn fursadda ah inaad qaado cudurka xiiqdheerta oo aad u gudbiso ilmahaaga.



## Tallaalkee ayaan qaadanayaa?

Tallaalka aan bixino xilliga uurka wuxuu sidoo kale kaa ilaalinayaa teetanada iyo gawracatada. Tallaaladan ayaa sii xoojinaya difaaca aad ka heshay tallaalladii caadiga ahaa ee aad soo qaadatay xilligii carruurnimada.

Waxaad halkan ka akhrisan kartaa wax ku saabsan tallaalka Adacel: www.medicines.org.uk/emc/product/15553/pil#gref

## Tallaalka xiiqdheerta ma yahay mid badbaado leh in la qaato xilliga uurka?

Wadamo badan oo ku yaala Yurub, Waqooyiga iyo Koonfurta Ameerika, Awstareeliya iyo New Zealand ayaa isticmaala tallaalka xiiqdheerta xilliga uurka wuxuuna tallaalka leeyahay diwaan wanaagsan oo xagga badbaadada ah.

Waxaa aad idin badbaado badan adiga iyo dhallaankaaga in aad qaadato tallaalka bedelkii aad dhallaankaaga halis u gelin lahayd cudurka xiiqdheerta.

**» Gacan ka gayso inaad ilmahaaga ka ilaaliso cudurka adiga oo qaadanaya tallaalka xiiqdheerta mar kasta oo aad uur qaado. Xaqiiji in ilmahaaga uu qaato tallaalka xiiqdheerta marka uu jirsado 8, 12 iyo 16 toddobaad.**

## Fayraska Habdhiska Neefsashada (RSV)

Fayraska habdhiska neefsashada ama RSV waa fayras caam ah kaas oo sababi kara caabuqa sambabada ee loo yaqaanno ‘bronchiolitis’. Ilmaha aadka u yaryar, xaaladdan caafimaad waxay ku sii adkeyn kartaa neefsashada iyo quudinta. Gudaha England, ku dhawaad 20,000 oo dhallaan ah ayaa isbitaal la dhigaa sanad walba iyaga oo qaba cudurka boronkiitada qaarna waxay u baahdaan daryeel degdeg ah. Tiro yar ayaa dhinta.

Cudurka RSV wuxuu u badan yahay inuu halis ku noqdo dhallaanka aadka u yaryar, kuwa dhasha xilli ka horeeya xilliga dhalmada, iyo kuwa qaba xaaladaha caafimaad ee saameeya wadnaha, neefsashada ama habdhiska difaaca jirka. Caabuqyada RSV waxay dhici karaan xilli walba oo sanadka ka mid ah laakiin kiisasku waxay aad u sarreeyaan jiilaalka kasta.

### Waa maxay sababta aan u qaadanayo tallaalka ka dhanka ah RSV?

Qaadashada tallaalka RSV inta aad uurka leedahay waxay kor u qaadi doontaa difaacaaga. Unugyada difaaca jirka ee jirkaaga uu soo saaro waxa loo gudbin doonaa ilmaha uurka ku jira. Antiboodhiyan waxay gacan ka gaysan doonaan inay ilmahaaga ka difaacaan RSV marka ay dhashaan.

### Goorma ayaan qaadanayaa tallaalka?

Waa in lagu siiyo tallaalka ku dhawaad usbuuca 28 ee ballantaada dhalmada ka hor ah.

Waa inaad isku daydaa oo aad qaadato tallaalkaaga usbuuca 28 ama sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah wixii markaas ka dambeeya. Tani waxay kaa caawin doontaa inaad yeelato heer wanaagsan oo unugyada difaaca jirka ah si aad ugu gudbiso ilmahaaga ka hor intaadan dhalin.

Weli waxaad tallaalka qaadan kartaa goor dambe ee uurkaaga laakiin waxaa laga yaabaa in uu waxtarkiisu yaraado. Haddii aysan kuu suurtagelin in aad qaadato tallaalka goor hore, waxa la qaadan karaa ilaa aad ka dhasho ilmahaaga.

Waa inaad qaadataa tallaalka RSV uurka kasta si aad u siiso ilmahaaga difaaca ugu fiican.

### Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka RSV?

Daraasadaha waxay muujinayaan in tallaalka RSV uu hoos u dhigo khatarta ah in ilmahaagu uu yeesho ‘bronchiolitis’ daran 70% inta lagu jiro 6da bilood ee ugu horreeya noloshooda.

Si la mid ah dhammaan dawooyinka, ma jiro talaal si dhammaystiran waxtar u leh, waxaana laga yaabaa in ilmaha qaarkood ay weli qaadaan caabuqa RSV in kasta oo ay hooyadood tallaalka qaadatey. Si kastaba ha ahaatee, inta badan ilmaha ay dhaleen hooyooyin la tallaalay, infekshanka RSV waxaa uu u noqonayaa mid aan darnayn.

### Tallaalkee ayaan qaadanayaa?

Waxaad ka akhrin kartaa halkan: www.abrysvo.com/

### Qaadashada tallaalka RSV inta lagu jiro muddada uurka miyay badbaado u tahay ilmahayga?

Tijaabo caafimaad oo lagu sameeyay ku dhawaad 4,000 oo haween ah, tallaalku wuxuu lahaa diiwaan wanaagsan oo badbaado waxaana hadda ansixiyay maamulayaasha dawooyinka ee UK, Yurub iyo Mareykanka. Kumanaan haween ah ayaa tan iyo markaas qaatay tallaalka iyadoo loo marayo barnaamijyada qaranka, oo ay ku jiraan in ka badan 100,000 oo haween ah oo ku nool Mareykanka.

Tijaabada caafimaad, tiro in yar ka badan ayaa dhashay marka kooxda tallaalka qaadatay loo barbardhigo kooxda aan la tallaalin. Kala duwanaanshiyahani wuxuu u muuqdaa mid ay sabab u tahay nasiib, laakiin tani waa mid ka mid ah sababaha tallaalka loo bixiyo laga bilaabo usbuuca 28 bedelkii loo bixin lahaa horaanta uurkaaga. Guud ahaan, aad bay adiga iyo dhallaankaagaba badbaado idin ku tahay inaad tallaalka qaadato bedelkii aad dhallaankaaga halis u gelin lahayd inuu qaado caabuqa RSV.

» **Qaado tallaalka RSV marka aad uur leedahay si aad u siiso ilmahaaga digaaca ugu wanaagsan 6da bilood ee ugu horreeysa noloshooda.**

## Hargabka (ifilada)

**Waa maxay hargabka/ifilada?**

Hargabku waa cudur aad u faafa oo leh astaamo ay ka mid yihiin qandho, qarqaryo, xanuun, madax-xanuun iyo daal aad u daran. Dumarka uurka leh waxaa badan fursada ah inay qaadaan dhibaatooyin halis ah oo uga yimaada hargabka, gaar ahaan marxaladaha dambe ee uurka, oo ay ku jiraan qaaditaanka cudurka oof-wareenka iyo xitaa dhimasho.

Hargabku sidoo kale wuxuu khatar gelin karaa uurkaaga, taasoo u horseedi karta dhalmo dhicis ah, ilmo miisaan yar iyo dhalitaanka ilmo dhintay.

Hargabku sidoo kale aad ayuu khatar ugu yahay ilmaha dhowaan dhashay iyo dhallaanka yaryar.

**Waa maxay sababta aan ugu baahanahay tallaalka hargabka inta lagu jiro xilliga uurka?**

Tallaalka hargabku wuxuu yareeyaa fursadda aad ku qaadi karto hargab aad u daran, inaad u baahato in isbitaal lagu dhigo ama inaad u baahato daryeel degdeg ah inta aad uurka leedahay. Wuxuu sidoo kale yareeyaa halista ah inaad la kulanto dhibaatooyinka uurka.

Tallaalku waxa uu kor u qaadaa difaaca jirkaaga ee ka hortagga ifilada kuwaas oo loo gudbiyo ilmaha uurka ku jira. Tani waxay xoogaa difaac ah siinaysaa dhallaankaaga dhowrka bilood ee ugu horreeya ee noloshooda.

Waxaa sidoo kale aad u yaraan doona inaad qaaddo hargabka oo aad u gudbiso ilmahaaga xilliga jiilaalka.

**Goorma ayaan qaadan karaa tallaalka?**

Tallaalka hargabka caadi ahaan waxaa la qaataa laga bilaabo Sebtembar sannad kasta waana u bilaash haweenka uurka leh.

Waa in aad qaadato tallaalka marka uu diyaar noqdo bisha Sebtembar, heer kasta oo uurkaaga marayo. Sida ugu fiican waa in aad qaadato tallaalka ka hor bilowga xilliga hargabka, laakiin weli waxaad qaadan kartaa tallaalka wakhti kasta oo jiilaalka ah.

Waxaad u baahan doontaa tallaalka hargabka mar kasta oo aad uur leedahay inta lagu jiro xilliga hargabka.



**Tallaalka hargabka ma yahay mid badbaado leh in la qaato xilliga uurka?**

Tan iyo sanadkii 2009 wadamo badan ayaa bixiyay tallaalka hargabka xilliga uurka, in ka badan 2 milyan oo tallaal ayaa la siiyay haweenka uurka leh ee gudaha England. Tallaalku wuxuu leeyahay diiwaan wanaagsan oo badbaado ah.

Guud ahaan, aad ayay badbaado kuugu tahay inaad qaadato tallaalka bedelkii aad naftaada ama ilmahaaga halis u gelin lahayd qaaditaanka caabuqa ifilada.

**Sidee ayuu waxtar u leeyahay tallaalka hargabka?**

Qaadashada tallaalka hargabka inta aad uurka leedahay waxay kala bar yareysaa halista aad adiga ama dhallaankaaga ugu jirtaan inaad qaadaan jirro hargabka oo kale ah. Dhallaanka ay dhaleen haweenka la tallaalay waxay 70% ka badbaadaan in la seexiyo isbitaalka sabab la xiriirta qabitaanka hargab inta lagu jiro 6da bilood ee ugu horreeya ee noloshooda.

**» Hargabka wuxuu cudur halis ah u noqon karaa haweenka uurka leh iyo dhallaankooda. Haweenka uurka leh waa inay qaataan tallaalka hargabka ee bilaashka ah inta ay uurka leeyihiin. Waxaa la siin karaa marxalad kasta oo uurkoodu marayo laga bilaabo bisha Sebtembar.**

**Maxaan sameeyaa hadda?**

Waxaad la hadli kartaa xarunta GP-gaaga, umulisadaada ama kooxda caafimaadka si aad ballan ugu qabsato tallaalkaaga. Hargabka, xiiq-dheerta iyo tallaallada RSV ayaa dhammaantood loo bixiyaa sidii hal cirbad ahaan oo lagu duro cudada. Waxyeellooyinka gaarka ah ee caadiga ah waa kuwa fudud waxaana ka mid ah:

- xanuun iyo guduudasho goobta la duray ah
- madax xanuun iyo murqo xanuun
- qandho fudud ama daal

Waxaad halkan ka akhrin kartaa buug-yaraha hargabka:

www.gov.uk/government/publications/flu-vaccination-who-should-have-it-this-winter-and-why


# Kahor intaadan uur yeelan

Haddii aadan weli uur yeelan, laakiin aad rajaynayso inaad uur yeelato mustaqbalka dhow, waa inaad xaqiijisaa inaad wada qaadatay tallaaladaada kale.

## Jadeeco-jarmal (Jadeecada Jarmalka)

Infekshanka jadeeco-jarmalka caadiyan waa infekshin fudud oo keena jirro finan leh.

Qaadista jadeeco-jarmalka xilliga uurka aad ayey ugu daran tahay dhallaankaaga, iyadoo sababaysa xaalad caafimaad oo loo yaqaano cudurka jadeeco-jarmalka ee ku dhaca uur-ku-jirta (congenital rubella syndrome, CRS). CRS waxay qofka u horseedi kartaa maqal-la'aan, arag la'aan, indho-beel (dhibaatada indhaha), dhibaatooyinka wadnaha iyo/ama dib u dhaca korriinka. Waxay kaloo sababi kartaa dhimashada ilmaha ama gaarista go'aanka ka takhluusida uurka.



**Ka hortagga cudurka jadeeco-jarmalka ee xilliga uurka**

Haddii aad qaadatay laba qiyaasood oo tallaalka MMR ah intii aad yarayd waxaad heli doontaa difaac wanaagsan inta aad uurka leedahay. Iyadoo looga mahadcelinayo barnaamijkayaga tallaalka ee guusha leh, infekshanka jadeeco-jarmalka hadda aad ayuu ugu yar yahay gudaha UK.

Haddii aadan hubin inaad qaadatay tallaalka, waxaad ka hubin kartaa GP-gaaga. Haddii aad seegtay, waa inaad cusboonaysiisataa tallaaladaada, sida ugu habboon ka hor intaadan uur yeelan. Haddii kale, waa in aad qaadato tallaalka isla marka ilmahaaga uu dhasho.

Tallaalka MMR wuxuu ka kooban yahay fayras nool (daciif ah) sidaas darteed laguma talinayo in la qaato xilliga uurka.

**Uur ayaanba leeyahay laakiin ma aanan qaadan tallaalka MMR, maxaan sameeyaa?**

Markaad dhasho, waxaad qaadan kartaa tallaaladaada MMR. Tani waxay adiga iyo ilmahaaga idin ka difaaci doontaa jadeecada iyo jadeeco-jarmalka. Qaadashada labada qiyaasood ee MMR waxay sidoo kale kaa ilaalin doontaa jadeecada iyo qaamo-qashiirta.

## Finan soo baxa xilliga uurka

### Maxaan sameeyaa haddii aan la kulmo qof finan qaba, ama haddii aan finan yeesho?

Qaar ka mid ah caabuqyada keena finan, oo ay ku jiraan jadeeco-jarmalka, waxay haweenka uurka leh u horseedi karaan dhibaatooyin. Xataa haddii lagaa difaaco jadeeco-jarmalka, waa inaad isla markiiba u sheegtaa umulisadaada, GP-gaaga ama dhakhtarkaaga dhalmada haddii aad qabto jirro finan ah ama aad xiriir la leedahay qof kale oo finan qaba wakhti kasta inta aad uurka leedahay.

Fadlan ka fogow rugaha caafimaadka hooyooyinka iyo dhallaanka, goobaha hooyooyinka ama haweenka kale ee uurka leh ilaa qiimayn lagaaga sameeyo.

Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo baaritaanno lagu ogaanayo in aad qaaday caabuq. Xirfadlaha caafimaadka ee ku qiimaynaya wuxuu u baahan doonaa inuu ogaado:

- inta usbuuc ee aad uur leedahay
- goorta uu dhacay xiriirka aad la yeelatay qof qaba finanka
- taariikhda aad markii ugu horreysay yeelatay finanka ama aad la xiriirtay qof qaba finanka
- sharaxaada finanka (ma finan soo taagan baa, finan barar ah miyaa mise waa finan ka buuxa dheecaan?)
- xanuunada kugu soo dhacay waqti hore sida busbuska, jadeecada
- tallaalada aad hore u soo qaadatay

» **Haddii aad la kulanto qof finan qaba ama haddii finan ay kaa soo baxaan markaad uurka leedahay, talo ka raadso GP-gaaga ama umulisadaada sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo. Haddii aad dib u dhigto ka warbixinta jirrada finanka yaryar ah waxaa laga yaabaa inaanay suurtogal noqonin in lagu siiyo cudur oggaansho sax ah ama daawaynta lagu taliyey.**



# Tallaalada kale ee ay tahay inaad kala hadasho umulisadaada

## COVID 19

Khatarta ah in la qaado COVID-19 xilliga uurka aad ayay uga yar tahay sidii ay ahayd bilowgii cudurkaas safmareenka ah, laakiin haweenka uurka leh ayaa weli u qalma qaadashada tallaalka dayrta. Tallaalku waxa uu yarayn doonaa fursada ah inaad qaado COVID-19 halis ah ilaa dhowr bilood, taas oo ah mid aad u muhiimsan haddii aad qabto xaalado caafimaad oo soo jireen ah. Unugyada difaaca jirka ee uu soo saaro jirkaaga waxa loo gudbin doonaa ilmaha uurka ku jira waxayna difaac siin doonaan ilmahaaga toddobaadyada iyo bilaha ugu horeeya ee noolashooda.

## Cagaarshowga B

Xilliga dhalashada, ilmaha ay dhalaan hooyooyinka qaba caabuqa cagaarshow B (ama kuwa laga helo cagaarshowga B inta ay uurka leeyihiin) waa inay qaataan tallaalka cagaarshowga B isla marka ay dhashaan. Waa in lala qorsheeyaa xarunta GP-gaaga in ilmahaaga uu qaato qiyaaso dheeraad ah oo tallaal ah iyo in dhiiga laga baaro marka isaga ama iyada ay gaaraan 1 sano jir si looga baaro caabuqa. www.gov.uk/government/publications/protecting-your-baby-against-hepatitis-b-leaflet

### BCG

Dhallaanka ay dhaleen waalid (ama leh ayeeyo/awoowe) ka yimid waddan ay tiibaydu ku badan tahay, waa inay qaataan tallaalka BCG si ay uga badbaadaan cudurka qaaxada. www.gov.uk/government/publications/tb-bcg-and-your-baby-leaflet

» **Qaadashada tallaalada lagu taliyey xilliga uurka (iyo ka dib dhalashada ilmahaaga) waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu waxtarka badan ee aad samayn karto si aad u yarayso khataraha infekshannada looga hortagi karo tallaalka ee idin ku dhici kara adiga iyo ilmahaaga.**

**Xaqiijinta in ilmahaaga uu helo tallaalkooda marka ay jiraan da'ada 8, 12 iyo 16 toddobaad waxay la macno tahay in difaacan uu sii socon doono sannadaha ay aadka u nugul yihiin.**

### Linkiyada macluumaadka dheeraadka ah

- www.nhs.uk/Conditions/vaccinations/Pages/vaccination-schedule-age-checklist.aspx
- www.gov.uk/government/collections/immunisation
- www.medicines.org.uk/emc/
- Si aad wax uga ogaato tallaalada ilmahaaga ee sanadka ugu horeeya ee noloshooda waxaad akhrin kartaa www.gov.uk/government/publications/a-guide-to-immunisations-for-babies-up-to-13-months-of-age



## Diiwaanka tallaalka uurka

Halkan hoose ku qor tallaalada uurkaaga si aad u xaqiijiso in adiga iyo ilmahaagu aydaan seegin ka hortagga/difaac ka helida cudurada ifilada, xiiqdheerta

| Tallaalka | Goorta ay tahay in la qaato | Taariikhda la bixiyay |
|---|---|---|
| **Hargabka** | Xilliga hargabka wakhti kasta inta aad uurka leedahay. | |
| **Xiiqdheerta** | Sida ugu fiican ka dib 18 ilaa 20 usbuuc ee iskaan saaristaada. Waxa la bixin karaa laga bilaabo usbuuca 16 ilaa wakhtiga dhalmada. | |
| **RSV** | Waa in aad qaadato tallaalka RSV marka uurkaaga uu gaaro usbuuca 28. | |
| **MMR Qiyaasta 1*** | Kadib marka ilmahaaga uu dhasho, baaritaankaaga dhalmada ka dib ah ee usbuuca 6 (ee aad la yeelanayso dhakhtarka guud ama kalkaalisada caafimaadka). | |
| **MMR Qiyaasta 2*** | Afar toddobaad kadib qiyaasta koowaad (sida kor ku xusan). | |

*Haddii uusan jirin tallaal hore

**Qaadashada tallaaladaada inta aad uurka leedahay waxay kaa caawinaysaa difaacida uurkaaga. La hadal umulisadaada, GP-gaaga ama kooxda caafimaadka oo xaqiiji inaad qaadato wakhtiga kuugu fiican adiga.**



© Crown copyright 2024
24PYPB01SO Somali. 1P 250K OCT 2024
UK Health Security Agency gateway number: 2024715
Markii ugu horreysay ee la daabacay Juun 2024

Buug-yerahan waxaa sidoo kale la heli karaa isagoo lagu turjumay luqado kala duwan oo qaabab kale ayaa lagu heli karaa. Si aad u dalbato koobiyo badan oo buug-yarahaan ah booqo: www.healthpublications.gov.uk ama taleefan u dir: 0300 123 1002, Minicom: 0300 123 1003 (8am ilaa 6pm, Isniin ilaa Jimco

**www.nhs.uk/conditions/vaccinations/nhs-vaccinations-and-when-to-have-them**